



MINNEAPOLIS

# SNOW EMERGENCY

## Maxay tahay macnaha ah marka lagu dhawaaqo “Gurmadka Barafka”?

Macnaheedu waxa weye in dadka laga doonayo in ay dhaqaajiyaan gawaaridooda ka dhaqaajiyaan in si cad oo dhamaystiran loo xaaqo barafka loona xaaqo wadooyinka, sidaas awgeed gawaarida dab demiska, gawaarida booliiska, gawaarida xaaladaha deg-dega (ambulansa) iyo gawaarida kale in si nabadgeliyo u socdaan. Haddii aadan dhaqaajinin gaarigaaga, waxaa la siin doonaa tikhid waana la jiid doonaa.

Marka barafka uu da'yo, waxaa raadisaa in haddii Magaalada Minneapolis ay ku dhawaaqday Gurmad Baraf:

- Wac taleefoonka 348-7669
- Dadka wacaya qeybta TTY waxay isticmaali karaan Warlalinta Minnesota (711) ama wac taleefoonka 673-2116
- Isticmaal kombyuutarkaaga: [www.ci.minneapolis.mn.us](http://www.ci.minneapolis.mn.us)
- Fiirso idaacadaha TV-ga magaalada ama ka dhageyso raadiyaha mowjadaha KBEM-FM (88.5 MHz)
- Fiirso kanaalada 14 iyo 79 ee Keebalka TV-ga Magaalada

Sow ma wanagsana, in aad hesho email kaaga digaaya ama fariin qoraal ah oo kaaga timidadao magaalada Minneapolis markii ay ku dhawaaqdo xaalad deg deg ah ee ku saabsan baraf da'ay. **Sidee?**

- Waxaad aadaa: [www.ci.minneapolis.mn.us](http://www.ci.minneapolis.mn.us)
- Waxaad riixdaa e- ku qeexan sanduuqa waxaadna raacdaa tilmaamada
- Haadan waxaad ka heli doontaa Magaalada Minneapolis fariinta e-mailka waqti kasta ee aan ku dhawaaqno Gurmad Baraf

## Gurmadka Barafka ee Minneapolis

### Killigaaga barafka ka yeel gaariga in aan lagaa jiidin

Fadlan akhri iyo meelna dhigo buug-yarahan si aad u keydsto kharashka iyo madax-xanuunka ka imaanayo gaarigaaga in lagaa jiid.

**Maalinta 1 19:00 fiidnimo ilaa 8:00 subaxnimo**

(habeenkii oo dhan)



Gurmadka Barafka waxaa lagu dhawaaqi doonaa ugu dambeyntii 6:00 galabnimo ee maalintaasi ah. **9 fiidnimo** ee maalintaasi, waxaa bilaabanaya sharciyada Gurmadka Barafka ee meelaha gawaarida la dhigto.

- **Gaariga waxaad dhigataa** dhinac kasta oo ka mid ah **Marinka wadooyinka aan-ahayn Gurmadka Barafka** (kuwani MA AHAN kuwa ku qornayn calaamada casaanka ah: “Wadada Gurmadka Barafka”)
- **Ha Dhiganin Gaariga** dhinac kasta oo ka mid ah wadooyinka leh **calaamada casaanka: “Wadada Gurmadka Barafka.”** Kuwa barafka xaaqa ayaa marka hore nadiifinaya wadooyinkaasi.

## Xilliga Gurmadka Barafka

Ka dib marka si **buuxda loo xaaqo** wasdooyinka ilaa wadada qeybteeda marshibiyeediyaha, si xur ah gaariga u dhigo, xitaa haddii sharciyada Gurmadka Barafka ee meelaha gawaarida la dhigto weli socdaan. “Si buuxda ayaa loo xaaqay” macnaheedu waxa weye **si dhamaystiran ayaa loo nadiifiyey loona xaaqay ilaa marshibiyeediyaha.** Xaaqidda hal ka badan ayaa la sameyn karaa, sidaasi awgeed, waxaad hubisaa in si buuxda loo xaaqa ilaa marshibiyeediyaha ka hor inta gawaarida la dhiganin.

# Gaariga yaan lagaa jiidin. Waxaad raacdaa sharciyada Gurmada barafka.

## Maalinta 2 8 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo



Waxaad gaariga dhigataa dhanka kisiga ee

Ha dhiganin gaariga dhanka dhabanka ee

Example of non-Snow-Emergency-route street

**8da subaxnimo.** Maalinta 2 sharciga gaari dhigashada ayaa bilaabanaya.

- **Waxaad gaariga dhigataa dhanka kisiga ee** wadooyinka Marinka aan-ahayn Gurmada Barafka (*tusaale:* guriga lambarka cinwaankiisu yahay: 1359 Maple ama 2513 17<sup>th</sup> Ave.)
- Gaariga waxaad dhigataa dhan kasta oo ka mid ah wadooyinka ee leh calaamada casaanka oo ku qoran: “Wadada Gurmada Barafka”

- **Ha dhiganin gaariga dhanka dhabanka ee** wadooyinka aan-ahayn Marinka Gurmada Barafka (*tusaale:* guriga lambarka cinwaankiisu yahay: 1356 Maple ama 2512 17<sup>th</sup> Ave.)
- **Ha dhiganin gaariga** dhan kasta oo ka mid ah **meelaha gawaarida la dhigto.**

## Maxaa dhacaya haddii gaariga la jiiday?

- Wac taleefoonka **311** (wacida dadka dhegaha culus waxay isticmaali karaan qeybta Warl-Laliska Minnesota ee
- U sheeg rukhsada lambarka gaarigaaga

Waxay baari doonaan haddii gaarigaaga la soo jiiday, waxayna ku siin doonaan tilmaamaha aad ku tagi lahayd meesha gawaarida lagu ururiyo ee cinwaankeedu yahay 51 Colfax Ave. N. Meesha gawaarida lagu ururiyo ee Minneapolis way furan tahay 24 saacadood maalintii xilliga Gurmadyada Barafka.

## Maalinta 3 8da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo



Waxaad gaariga dhigataa dhanka kisiga ee

Ha dhiganin gaariga dhanka dhabanka ee

Example of non-Snow-Emergency-route street

**8da subaxnimo.** Maalinta 3 waxaa bilaabanaya sharciyada meelaha gawaarida la dhigto

- **Waxaad dhigataa gaariga dhanka dhabanka ee** wadooyinka aan-ahayn Marinka Gurmada Barafka (*tusaale:* guriga lambarka cinwaankiisu yahay: 1356 Maple ama 2512 17<sup>th</sup> Ave.)
- Waxaad gaariga dhigataa dhan kasta oo ka mid ah wadooyinka ku taalo calaamada casaanka ah ee: “Wadada Gurmada barafka” waxaadna gaariga dhigan kartaa meelaha gawaarida la dhigto
- **Ha dhiganin gaariga dhanka kisiga ee** wadooyinka Marinka aan-ahayn Gurmada Barafka (*tusaale:* guriga lambarka cinwaankiisu yahay: 1359 Maple ama 2513 17<sup>th</sup> Ave.)

## Maxaa layga rabaa si aan gaariga uga soo qaato rugta lagu hayo gawaarida la soo jiiday?

Waxaa jira ganaax Birmadka Barafka ah ee ujrada lagu geeyay rugta gawaarida lagu hayo. Ujrada haynta ayaa laga yaaba lagu sii daro jiiditaanka. Waad soo wici inta aadan rugta imaan si aad ku oogatid qarashka lagaa rabo ee aad gaariga kua soo baxdid; wac **311**.

Waxay aqbalayaan lacag caddaan ah, jeeg, jeega lasoo iibsado (money orders), VISA iyo MasterCard.